Nafyay hadimada ka dhawrso	H <> <i>so</i>	<i>O soul! Beware of committing deceit,</i>
Guushana marinkeeda haybso	H <> <i>so</i>	<i>And strive to the path of success,</i>
Tallaaba halkaad dhigayso	H <> <i>so</i>	<i>And as of your next step,</i>
Horteeda bal aad u fiirso	H <> <i>so</i>	<i>Consider it carefully.</i>
Rajada hubaal ku doorso	H <> <i>so</i>	<i>Choose certainty over dreams,</i>
Runtana hilinekeeda beegso	H <> <i>so</i>	<i>and take the line of truth,</i>
Haddaad hadal iga maqlayso	H <> <i>so</i>	<i>And if you bear to listen to me,</i>
Haweenka middaad tabayso	H <> <i>so</i>	<i>and as for the woman you dream about,</i>
Hankaaga sharaf ku raadso	H <> <i>so</i>	<i>Look for your pride with grace.</i>
Markaad hindisaha qorshayso	H <> <i>so</i>	<i>and when you're planning your project,</i>
Halkaad geeddiga furayso	H <> <i>so</i>	<i>Where you un-saddling your caravan,</i>
Si aad hirasho u dhabayso	H <> <i>so</i>	<i>Lest to achieve your aspiration,</i>
Hawshaada dedaal ku biirso	H <> <i>so</i>	<i>Supplement your work with effort</i>
Nafyay hanashada ku diirso	H <> <i>so</i>	<i>O soul! Let victory brightens you,</i>
Hantaaqiyo ciil ka rayso	H <> <i>so</i>	<i>and free yourself from and resentment,</i>
Maankoy garashadu hagayso	H <> <i>so</i>	<i>While led by foresight, your mind,</i>
Himiladaadana ku raadso	H <> <i>so</i>	<i>Look for your dreams.</i>
Xaqiiqda intaad helayso	H <> <i>so</i>	
Hagaaga waxaad bidayso	H <> <i>so</i>	
Inaad liibaan ka hoyso	H <> <i>so</i>	
Markaad hor Allee danayso	H <> <i>so</i>	
Hagrasho waligaa ka baaqso	H <> <i>so</i>	

4.2.3. Song: *Lahasho. Double Alliteration on L + L + End Rhyme ya*

Lyricist Cabdiraxmaan Cismaan Cumar “Xaaji”, year wrote 2016. Metric type “*Jiifto*”. Alliteration *L*, *L* and end rhyme *ay*. Music composer Maxamed Axmed Bakaal “Cirro”. Musician Axmedweli Ibraahin Maxamuud Furinleh. Vocalists Ifraax Hargaysa [20]. Translated by Nasar Dahir Mohamed and Jama Musse Jama.

Youtube link: <https://www.youtube.com/watch?v=rRQPWUG4IM>

Ladhkiyo xiisaha lallaaya	L L <> <i>aaya</i>	<i>Aspiration of love</i>
Lahasho maanka i lulmanaaya	L L <> <i>aaya</i>	<i>And overwhelmed heart</i>
Jacayl laabaha lullaaya	L L <> <i>aaya</i>	<i>And the vibration of feelings</i>
Laftiyo dhuuxa laasimaya	L L <> <i>aaya</i>	<i>The one in the bone marrows</i>
Adigoo ka ladanoo ladaaya	L L <> <i>aaya</i>	<i>That cured me deep</i>
Laydhiyo hawada leexaysanaya	L L <> <i>aaya</i>	<i>The one in the air</i>
Aniga lurkaygana libaysanaaya	L L <> <i>aaya</i>	<i>Chased by depression</i>
Sawnigan laylkii lalmanaaya	L L <> <i>aaya</i>	<i>And sleepless nights</i>
Lillaahi bal maxa i luraaya	L L <> <i>aaya</i>	<i>Honestly tell me, why this all on me</i>
Lubigiyo dookha laacdamaaya	L L <> <i>aaya</i>	<i>Battle of love and choice</i>
Laxawga beerka ladaabanaya	L L <> <i>aaya</i>	<i>Irritating deep affection</i>
Lahwigan hanka leexsanaaya	L L <> <i>aaya</i>	<i>Tricky that beat the intellect</i>
Lurkaa qalbigaa ku laxaadsanaya	L L <> <i>aaya</i>	<i>Power to of downing the hearts</i>
Luggooyo adigoo ku ladhaaya	L L <> <i>aaya</i>	<i>With broken promise</i>
Laaloo xubigana ku loolaaya	L L <> <i>aaya</i>	<i>And played emotions</i>
Aniga lurkaygana libaysanaaya	L L <> <i>aaya</i>	<i>Chased by depression</i>
Sawnigan laylkii lallmanaya	L L <> <i>aaya</i>	<i>And sleepless nights</i>

Lillaahi bal maxa i luraaya

L L <>aaya

*Honestly tell me, why this all on me***4.2.4. Song: Mabsuuday. Double Alliteration on M + M + End Rhyme ay**

Lyricist Cabdiraxmaan Cismaan Cumar “Xaaji”, year wrote 2019. Metric type Baarcadde. Double alliteration *M, M* and end rhyme *ay*. Music composer Sir Maxamuud Cumar. Musician Axmedweli Ibraahin Maxamuud Furinle. Vocalists Maxamed Axmed Bakaal “Cirro” [20]. Translated by Hamdi Ali Mahamud and Jama Musse Jama.

Youtube link: <https://youtu.be/hBDfRrQ8IMI>

Mabsuuday, dartaa muusooday	M M <>ay	<i>Pleased, for you I smiled</i>
Muxubbo awgaa muraaqooday	M M <>ay	<i>In love, for you I dreamed</i>
Haddana marwow kuu madiixay	M M <>ay	<i>Yet again felt amazed</i>
Kalgacal mug wayn kugu marriimay	M M <>ay	<i>The greatest love I have for you</i>
Hir magoolay kugu mataalay	M M <>ay	<i>To my eyes you are gorgeous</i>
Maanshayoo jacaylkaa miskeedshay	M M <>ay	<i>For your love, I am in awe</i>
Midhihi baxayaba kugu macsuumay	M M <>ay	<i>The sweetest fruits I served for you</i>
Shaygii mudanba kula maseeyey	M M <>ay	<i>The silkiest clothes I want to wear</i>
Kaama maarmo, kaama maarmee,	M M <>ay	<i>I refuse to exist without you</i>
Kaama marmee, midigtaada ii dhiib	M M <>ay	<i>Give me your hand to hold on to</i>
Masalooday, la'aantaa maansooday	M M <>ay	<i>Without you, I am in wonder</i>
Mahadho awgaa murugooday	M M <>ay	<i>Indeed, I am the unhappiest</i>
Meeqaamka sharaftaada miisaamay	M M <>ay	<i>Your magnificence I value</i>
Muunaddii adduun ugu macneeyey	M M <>ay	<i>As the only one in the world</i>
Macaanay nafta kula mataanshay	M M <>ay	<i>Sweetheart I twined myself to you</i>
Maalmahaa aduun kula midoobay	M M <>ay	<i>In the worldly days I harmonized with you</i>
Maskaxdiyo qalbiga kugu maamuusay	M M <>ay	<i>In my thoughts and heart, I honored you</i>
Mahiigaan jacayl kugu masheeyey	M M <>ay	<i>A heavy rain of love I inundated you</i>
Kaama maarmo, kaama maarmee,	M M <>ay	<i>I refuse to exist without you</i>
Kaama marmee, midigtaada ii dhiib.	M M <>ay	<i>Give me your hand to hold on to</i>

4.2.5. Song: Tallaabo. Alliteration on N + End Rhyme an

Lyricist Cabdiraxmaan Cismaan Cumar “Xaaji”, year wrote 2016. Metric type “Jiifto”. Alliteration *N* and end rhyme *n*. Music composer Nimcaan Xasan Hillaac. Musician Ahmedweli Ibraahin Furinle. Vocalists Nimcaan Xasan Hillaac [20]. Translated by Hamdi Ali Mahamud and Jama Musse Jama.

Youtube link: <https://www.youtube.com/watch?v=8J0pqDQZ2X4>

Ifka noolaha ku sugan	N <>an	<i>In the whole world of beings</i>
Nafle adiga kula siman	N <>an	<i>Full of souls</i>
Naawilaadda maan filan	N <>an	<i>Never encountered one like you</i>
Korkaaga nal baa sudhan	N <>an	<i>You shine like a lighting star</i>
Dayaxa nuurkiisa shidan	N <>an	<i>Together with the moon light</i>
Nafyahay adigaa ka dhigan	N <>an	<i>O soul, you are like that</i>
Adduunyada noloshiisa wacan	N <>an	<i>You mean the whole world to me.</i>
Nagaanshi aday iigu filan	N <>an	
Jacaylka nacabkiisa badan	N <>an	<i>Enemies of love</i>
Naxligiyo warkooda daran	N <>an	<i>With their hurtful words</i>
Nacam waligaa ha odhan	N <>an	<i>Stay vigilant</i>
Nitaaqana ha iga filan	N <>an	<i>And I will do the same</i>
Nasab sharaf iga mudan	N <>an	<i>You have my greatest respect</i>
Naruuroow adigaa ugu wacan	N <>an	<i>You, the best of the best</i>
Niyaddiyo maanka culan	N <>an	<i>You, the magnificent</i>
Nabdigayga adigaa ku dhalan	N <>an	<i>You run in my mind</i>
Nuddayda adigaa ku qoran	N <>an	<i>You are dear to my heart</i>
Naftani xaggaaga u diran	N <>an	<i>My soul is ready to serve you</i>
Nugayl cishqigaa bu ku furan	N <>an	<i>worries sometimes</i>
Nasiibkana Rabbaa u maqan	N <>an	<i>with high fear not to lose you</i>
Jacaylka nacabkiisa badan	N <>an	<i>Enemies of love</i>
Naxligiyo warkooda daran	N <>an	<i>With their hurtful words</i>
Nacam waligaa ha odhan	N <>an	<i>Stay vigilant, I will do the same</i>

Nitaqaana ha iga filan

N < > an

4.2.6. Song: Hawraarsan. Alliteration on H + End Rhyme san

Lyricist Cabdiraxmaan Cismaan Cumar “Xaaji”, year wrote 2018. Metric type “Jiifto”. Alliteration *H* and end rhyme *san*. Music composer Cabdicasiis Cali Ciise “Iskilaaji”. Musician Maxamed Sheegow Bushaar. Vocalist Deeq Dheeg [20]. Translated by Nasra Dahir Mahamed and Jama Musse Jama.

Youtube link: <https://www.youtube.com/watch?v=8dPYRHanNP8>

Dhiggaa anigaan hawaysan	H < > san	<i>I don't chase after others</i>
Dartaa caashaqa hanuunsan	H < > san	<i>I am on path of your love</i>
Hankiyo dookhaa ku raacsan	H < > san	<i>You are my type</i>
Aawadaa hadrayoo hillowsan	H < > san	<i>I will be saying your name in the middle of the night</i>
Haybad iyo hannaansan	H < > san	<i>Your prestige; how you present yourself to me</i>
Qalbigaa ku hantoo hibaysan	H < > san	<i>All that made me let you in my heart</i>
Jacayl la huboo hagaasan	H < > san	<i>Well assured love</i>
Adaa igu haboo hoggaansan	H < > san	<i>You have given me</i>
Anna kuma huree hawraarsan	H < > san	<i>Won't trade for anything – Welcome</i>
La'aantaa anigaa hallowsan	H < > san	<i>I am lost without you</i>
Gayaan ka hadhoo habowsan	H < > san	<i>Lost in your word</i>
Lubbigaad hantidaa hammuusan	H < > san	<i>The heart you guided your way</i>
Kalsooni hadafloo habaysan	H < > san	<i>I have trust in you</i>
Dhexdeenna himilo qorshaysan	H < > san	<i>And the plan of our future</i>
Adigaan kula hiigsadaa heersan	H < > san	<i>I crave you excellence</i>
Jacayl la huboo hagaasan	H < > san	<i>Well assured love</i>
Adaa igu haboo hoggaansan	H < > san	<i>You have given me</i>
Anna kuma huree hawraarsan.	H < > san	<i>Won't trade for anything - Welcome.</i>

4.2.7. Song: Cugasho. Alliteration on C + End Rhyme ayd

Lyricist Cabdiraxmaan Cismaan Cumar “Xaaji”, year wrote 2017. Metric type *Jiifto*. Alliteration *C* and end rhyme *ayd*. Music composer Cabdicasiis Cali Ciise “Iskilaaji”. Musician Maxamed Abdilahi Diiriye “Bulshaawi”. Vocalist Abdikariin Cali Shaah [20]. Translated by Mohamed Abdirahman Yusuf and Jama Musse Jama.

Youtube link: <https://www.youtube.com/watch?v=IFevRwnanBs>

Markay cugashadu samayd	C < > ayd	<i>When the selection was virtue,</i>
Markay barashadu cusbayd	C < > ayd	<i>We were getting to know each other,</i>
Markay hanashadu cuslayd	C < > ayd	<i>Gaining the other was hard,</i>
Kashaadu intay culnayd	C < > ayd	<i>While your heart was innocent,</i>
Intay xaajadu caddayd	C < > ayd	<i>And the affairs were clear,</i>
Cawo iyo farxad bay ahayd	C < > ayd	<i>It was a blessing and joy.</i>
Intay cabashadu yarayd	C < > ayd	<i>When the lamentation was few,</i>
Calmashadu rajo bay lahayd	C < > ayd	<i>There was hope for the love,</i>
Dhaliishu cisi bay lahayd	C < > ayd	<i>Then groaning was a liking,</i>
Canaantuna xaqbay ahayd	C < > ayd	<i>You were right for scolding me.</i>
Markay hirashadu cufnayd	C < > ayd	<i>When the need to win over was great,</i>
Markay higsashadu cugnayd	C < > ayd	<i>We chose to strive,</i>
Naftaydu caynaan lahayd	C < > ayd	<i>I had a hope,</i>
Calool nugul bay lahayd	C < > ayd	<i>She had tender heart,</i>
Cakuye dareen bay lahayd	C < > ayd	<i>Oh! She had feelings towards.</i>
Cindiga hagratah lahayd	C < > ayd	
Intay cabashadu yarayd	C < > ayd	<i>When the lamentation was few,</i>
Calmashadu rajo bay lahayd	C < > ayd	<i>There was hope for the love,</i>
Dhaliishu cisi bay lahayd	C < > ayd	<i>Then groaning was a liking,</i>
Canaantuna xaqbay ahayd	C < > ayd	<i>You were right for scolding me.</i>

4.2.8. Song: Dhaleeco. Alliteration on Dh + End Rhyme naya

Lyricist Cabdiraxmaan Cismaan Cumar “Xaaji”, year wrote 2016. Metric type “Jiifto”. Alliteration *Dh* and end rhyme *naya*. Music composer Cabdinaasir Macallin Caydiid. Musician Maxamed Cabdillaahi Diiriye “Bulshaawi”. Vocalist Najma Nashaad [20]. Translated by Hamdi Ali Mahamud and Jama Musse Jama.

Anigoo ku dhawranaya	Dh < > naya	<i>Compelled myself to keep you safer</i>
Dhibta ka ilaashanaya	Dh < > naya	<i>From the harm all together</i>
Waliba kugu dhaadanaya	Dh < > naya	<i>Your, the apple of my eyes</i>
Adaa nacab dhaaranaya	Dh < > naya	<i>The evil eyes</i>
Dhaleeco kula raadinaya	Dh < > naya	<i>Who wants to hurt you</i>
Dhibtaadana beegsanaya	Dh < > naya	<i>Want you in trouble</i>
Aniga i dhaafsanaya	Dh < > naya	<i>You stay ignorant about them</i>
Dhexdeena khilaaf miranaya	Dh < > naya	<i>Disagreements we share</i>
Dhamme adoo hagranaaya	Dh < > naya	<i>Let's end them together</i>
Qalbiga ku dhawaysanaya	Dh < > naya	<i>My heart in owe for you</i>
Aduunbaa dhayalsanaya	Dh < > naya	<i>My dear, take me serious</i>

4.2.9. Song: *Hirasho*. Alliteration on D + End Rhyme ashada

Lyricist Cabdiraxmaan Cismaan Cumar “Xaaji”, year wrote 2014. Metric type *Jifto*. Alliteration D and end rhyme *ashada*. Music composer Cabdihani Xaashi Cabdillaahi. Musician Axmed Weli Ibraahin Furinle. Vocalists Cabdihani Xaashi Cabdillaahi and Asma Axmed Ismaaciil “Asma Love” [20]. Translated by Nasra Dahir Mahamed and Jama Musse Jama.

Youtube link: <https://www.youtube.com/watch?v=C01NJITXLzs>

[female voice]

Duunyo waa dhigashada	D < > ashada	<i>The goodness of wealth is collecting</i>
Dersi waa dhugashada	D < > ashada	<i>The sympathy the lesson is attention</i>
Diirku waa dhalashada	D < > ashada	<i>Color tells brotherhood</i>
Dadna waa dhaqashada	D < > ashada	<i>And the people are raised</i>
[male voice]		
Anna doorkan hollashada	D < > ashada	<i>I choose you</i>
Doondoona lahashada	D < > ashada	<i>And love the belongings you show me</i>
Ama dowga garashada	D < > ashada	<i>And your intellect</i>
Iyo daadka hibashada	D < > ashada	<i>And the motion of missing</i>
[both]		
Waa dareenka muhashada	D < > ashada	<i>Indeed it's the desire of affection</i>
Iyo dookha jamashada	D < > ashada	<i>And selection love</i>
Waxaan damqashada	D < > ashada	<i>And the caring</i>
Kugu doortay xulashada	D < > ashada	<i>Choose you</i>
[female voice]		
Dugsi waa tabcashada	D < > ashada	<i>The shelter is an effort</i>
Duco waa kasbashada	D < > ashada	<i>Prayers are earned</i>
Danbi waa hagrashada	D < > ashada	<i>Sins howled</i>
Dadna waa barashada	D < > ashada	<i>Surely people are learned</i>
[male voice]		
Dalandoolka toyashada	D < > ashada	<i>The hardness of seeking you</i>
Durba maanku gocashada	D < > ashada	<i>A remembrance of love</i>
Doonistiyo tabashada	D < > ashada	<i>And feeling lonely without you</i>
Ma la diidey hafashada	D < > ashada	<i>Gave me astonishing</i>
[both]		
Waa danaynta hirashada	D < > ashada	<i>It is the feeling of emotions</i>
Iyo doorka xulashada	D < > ashada	<i>And the way that I choose you</i>
Waxaan deexashada	D < > ashada	<i>That made to me wait for you</i>
Kugu daalay filashada	D < > ashada	

4.3. Lyricist: Maxamed Cadoosh [Qiiq]

Song: *Xamda*. Alliteration on X + end rhyme ka

Lyricist Maxamed Cadoosh. Year wrote 2016. Alliteration X and end rhyme *ka*. Music composer Cabdixakiin Cabdillaahi Qiiq. Musician Ahmedweli Ibraahin Furinleh. Vocalist Mursal Ciise Cumar [20]. Translated by Nasra Dahir Mahamed and Jama Musse Jama. Youtube link: <https://www.youtube.com/watch?v=fMzeSf2JuKQ>

Xamdaay midabkaaga nuurka	X < > ka	<i>Oh! Hamda your glowing skin</i>
La moodo xariir dhalaalka	X < > ka	<i>Shining like a silk</i>
Xubnaha qoran iyo hubqaadka	X < > ka	<i>The perfect body, gorgeous and elegance</i>

Xusuusta ku reebay nuurka	X < > ka	<i>My mind be reminiscing about you</i>
Ayaa xadantada jacaylka	X < > ka	<i>Tickly of love</i>
Ku xaawilay oo dareenka	X < > ka	<i>Butterfly affect</i>
Adaa xiddigyahay haweenka	X < > ka	<i>You are the first</i>
U mudan quruxda iyo xishoodka	X < > ka	<i>For the beauty and shyness</i>
Xabiibi aniguna geyaanka	X < > ka	<i>My love, I choose you</i>
Adaan kaa xushee haweenka	X < > ka	<i>I selected you from the women</i>
Goormaynu xusnaa jacaylka	X < > ka	<i>When can we reveal our love?</i>
Xafladda qabanaa arooska	X < > ka	<i>And celebrate our wedding day?</i>
Markaan kaa helay xaqdhowrka	X < > ka	<i>When I found respect in you</i>
Ayaad sida xareedda roobka	X < > ka	<i>And felt the sense of purity that's "when"</i>
Xiisihii igu ladhay harraadka	X < > ka	<i>Emotions of excitement</i>
Xaqiiq ka dawaysay beerka	X < > ka	<i>Started to drop like raindrops</i>
		<i>Surely that healed me</i>
Xasadka kala dila gayaanka	X < > ka	<i>The envy that separates the loved once</i>
Ku kala xada been abuurka	X < > ka	<i>By making a false accusation</i>
Adoo ka xafiday jacaylka	X < > ka	<i>You protected our love scatters</i>
Xogteniina ka qariyey namiimka	X < > ka	<i>Besides your hide our secret from an enemy</i>
Xabiibi aniguna geyaanka	X < > ka	<i>My love, I choose you</i>
Adaan kaa xushee haweenka	X < > ka	<i>I selected you from the women</i>
Goormaynu xusnaa jacaylka	X < > ka	<i>When can we reveal our love?</i>
Xafladda qabanaa arooska	X < > ka	<i>And celebrate our wedding day?</i>

4.4. Lyricist: Xasan Saleebaan Dhuxul "Laabsaalax"

Song: Amiisha. Double alliteration on Alif, Alif + end rhyme a

Lyricist Xasan Saleebaan Dhuxul "Laabsaalax". Year wrote 2015. Alliteration *Alif* + ending *a*. Music composer Cumar Yare. Musician: Ahmedweli Ibraahin Furinleh. Vocalist Mohamed Siciid Cabdi "BK" [25]. Translated by Hamda Abdiwahab Saeed and Jama Musse Jama.

Youtube link: <https://www.youtube.com/watch?v=mbM7BX6nUKg>

Akhlaada, xishoodka, asluubta	Alif Alif < > a	<i>Your ways of shyness</i>
Addeeca, dulqaadaka, iimaanka	Alif Alif < > a	<i>Obedience, patience, and faith</i>
Aadmigu kama sinna aqoonta	Alif Alif < > a	<i>Nobody is the same as you</i>
Axanka dadnimo iyo abuurtaada	Alif Alif < > a	<i>Your essence of humanity and compassion</i>
Afkaygu ma koobo ammaantaada	Alif Alif < > a	<i>My word will never speak enough</i>
Ilaahay ku saday Aaminaay	Alif Alif < > a	<i>All that God has given you, Amina!</i>
Ilaahay ku saday Amiishaay	Alif Alif < > a	<i>All that God has given you, Amiisha!</i>
Indhaha kaligaa ku eegta	Alif Alif < > a	<i>My eyes only see you</i>
Ilmana naxariis la ooya	Alif Alif < > a	<i>They tear with emotion</i>
Agtooda ka muuqo Amiishaay	Alif Alif < > a	<i>Be in their gaze, Amiisha!</i>
Aamina, Aamina, Amiisha.	Alif Alif < > a	<i>Amina, Amina, Amiisha</i>
Ayaanka, hubqaadka, ilwaadka	Alif Alif < > a	<i>Beautiful, elegant and lucky</i>
Odhaahda runteeda abbaarta	Alif Alif < > a	<i>Your statement is always true</i>
Oogaantoo dantayda astaysa	Alif Alif < > a	<i>Took care of me better than I myself do</i>
Udubka aqalkiyo dhigtiisa	Alif Alif < > a	<i>Be the pillar and support</i>
Oorida waligeed adkaysa	Alif Alif < > a	<i>And protector of the house</i>
Ahow samirkana ogaata	Alif Alif < > a	<i>Keeping your patient</i>
Ahow Amiishaay ogaata	Alif Alif < > a	<i>Be the one Amiishaay</i>
Indhaha kaligaa ku eegta	Alif Alif < > a	<i>My eyes only see you</i>
Ilmana naxariis la ooya	Alif Alif < > a	<i>They tear with emotion</i>
Agtooda ka muuqo Amiishaay	Alif Alif < > a	<i>Be in their Amiishaay look</i>
Aamina, Aamina, Amiisha.	Alif Alif < > a	<i>Aamina, Aamina, Amiishaay</i>

4.5. Lyricist: Axmed Xaraf

Song: Isra. Alliteration on Dh + end rhyme san

Lyricist Axmed Xaraf, year wrote 2019. Metrics type "Jiifto" Alliteration *Dh* and end rhyme *san*. Music composer Saxardiid Maxamed Saxardiid. Musician Saxardiid Maxamed Saxardiid. Vocalists Cabdihani Xaashi Cabdillaahi [20]. Translated by

Nasra Dahir Mahamed and Jama Musse Jama.

Dhaqan lagu daydoo hagaagsan	D h < > san	<i>Charm and attractive with cherished beauty</i>
Dhaban lagu hirtoo habaysan	Dh < > san	<i>The holder of my future</i>
Adaa dhaxlayoo hadaysan	Dh < > san	<i>Oh you the well-mannered one</i>
Dhammays adigaa hanuunsan	Dh < > san	<i>Oh you the one with the cherished beautify</i>
Israay adigaa u dhowrsan	Dh < > san	<i>Oh you the one on the right path</i>
Dhiggaa adigaa u doorsan	Dh < > san	<i>You the perfect one</i>
Dhabeel iyo gaari muuqsan	Dh < > san	<i>The searched for, oh Isra!</i>
Dhabtii adigaa hoggaansan	Dh < > san	<i>The chosen one</i>
Anaa adi kuu dhitaysan	Dh < > san	<i>One with intellect</i>
Ku dhaatoo kuu hanuunsan	Dh < > san	<i>The obedient one</i>
Israay adigoo dhayalsan	Dh < > san	<i>You won over me</i>
Dhaweef naftan kuu riyaqsan	Dh < > san	<i>Loyal and grateful to have you</i>
Naftan dhitaysan	Dh < > san	<i>Take me seriously, Isra!</i>
Dhabtii hamuunsan	Dh < > san	<i>Embrace my passionate soul</i>
Adoon dhayalsan	Dh < > san	<i>The chosen one</i>
Israay dhabaal san	Dh < > san	<i>Embrace my passionate soul</i>
Afkaar dhawaaqsan	Dh < > san	<i>Ideas expressed</i>
Hadmay ku dheefsan	Dh < > san	<i>The sad soul</i>
Jacayl dhibtiisan	Dh < > san	<i>Trouble of love</i>
Dhawaan ka raysan	Dh < > san	<i>When did this soul will leave all these</i>

4.6. Lyricist: Maxamed Aw Cali Cartan

4.6.1. Song: *Gelbis*. Alliteration on G + G.

Lyricist Maxamed Aw Cali Cartan, year wrote 2019. Metrics type “Jiifto”. Alliteration G and G. Net yet arranged s music for it [26]. Translated by Nasra Dahir Mahamed and Jama Musse Jama.

Gugoo hoorayo dayrtoo godlatay	G G	<i>When the spring sprung, and the fall got ready to rain</i>
Cirkoo gabbaldhaca gadaangad xidhey	G G	<i>The skies in late afternoon, filled</i>
Heegiyo ku gadaaman guullaamo	G G	<i>With clouds, mist and storm</i>
Gimishiyo waqalku garayska furtey	G G	<i>And the rain clouds exposed itself naked</i>
Dirir gaamur da'ay gadaal ka curtey	G G	<i>A robust Dirir rains resumed raining</i>
Fadkii ku gab yidhi gadhoodh bururshay	G G	<i>Large clouds palled and raindrops scattered</i>
Habeen galindhexe gudugude hoorey	G G	<i>A midnight, Gudgude rain gushed and</i>
Godankiyo jeexa xareed gogladay	G G	<i>All curved bends filled with rainwater</i>
Hillaac galalgashaa, galaabixiyey	G G	<i>Flash of lighting rolling over and</i>
Indhaha galalacda daraandar gashay	G G	<i>Roving through the skies</i>
Inkodkiyo gadoodka guuxreemay	G G	<i>Their blazing blinding eyes</i>
Waagiyo guduudka gaadhmeershay	G G	<i>The groaning roars of thunder</i>
Cawaaluhu gadaal marsooyin gudbay	G G	<i>Early morning sun circled</i>
Mayay galbis ihi ku soo gaadhay	G G	<i>Reddish through the heavens</i>
Sagal guduudani dhex guuraayo	G G	<i>Windfall spread beyond boundaries</i>
Galowga baroortay dhiillo gashay	G G	<i>Pursued by Mayay rain in procession</i>
Barwaaqo is gaadhay geedowdiyo	G G	<i>Dawn light rays floating in between</i>
Gugay dhalatay gobaad la baxdee	G G	<i>She was named Gobaad, after the spring she born</i>
Haddaan guursado Alley galladee	G G	<i>Marrying her will be a blessing</i>
Gob baa hambalyaysa gayaan is helee	G G	<i>Nobles congratulate equals bonded</i>
Geeraar iyo hees ninkuu gabyayow	G G	<i>Oh! You singing a song and reciting a poem</i>
Galbaska ha ku bakhaylin waa gaafe.	G G	<i>Don't be stingy, this is a celebration</i>

4.6.2. Song: *Hibaaq*. Alliteration on H + M + H + M.

Lyricist Maxamed Aw Cali Cartan, year wrote 2019. Metrics type “jiifto”. Alliteration H, M, H and M. Net yet arranged a music for it [26]. Translated by Nasra Dahir Mahamed and Jama Musse Jama.

Suugaanta hog miida hoobaan malab tiixda	H M H M	<i>Purity of literature, sweetness of sagacity</i>
Hilaad la minguursho haloosiga muuqda	H M H M	<i>Alteration of poetry, hallucination of appearances</i>

Hawraatiyo maayad midhaa hodankooda	H M H M	<i>Test of stylishness words</i>
Mucdii halabuurka haraaqaha maaxday	M H H M	<i>Lightness of words, Wisdom of poet's</i>
Hammiga maankaygu Hibooy la madiixay	H M H M	<i>Eagerness of wanting you, thinking of you</i>
Hibaaq ku marriintay heesaa ku malxiisan	H M H M	<i>Scent like flower, graceful poetry</i>
Halhayso mataana maahmaah ku hagoogan	H M M H	<i>Wise words covered with proverbs</i>
Higgaad iyo maanso heellaan mariyee	H M H M	<i>Made my mind to write, graceful poets for you</i>
Hogtaan marqa furay hibeeyay milgee	H M H M	<i>I remove my pride for you</i>
Hankayga manaamka hawaa miratoo	H M H M	<i>Your love is penetrated my arrogance</i>
Habeennimo maaxay murtiyo heesoo	H M H M	<i>Sleepless nights for writing poems for you</i>
Hillaaca i maray hawaawi mudhoo	H M H M	<i>Your lighting stuck in me</i>
Huraalkiyo miidda ka hoor mulayoo	H M H M	<i>It's pure and truthful</i>
Mullaax hadyaddeeda haaneedka maree	H M H M	<i>Bright as sunshine without any doubts</i>
Horraadka miskeedka markaaga hanoo	H M H M	<i>Try to win my heart as I am frustrating to win yours's</i>
Hasaawe mullaax leh hir muuqdiyo guur	H M H M	<i>Eloquent talk with anticipation of marriage</i>
Hannaanka milgaa leh ka hoo midigtoo	H M H M	<i>Elegance is all yours</i>
Hadmaan mudankaaga haldoor madaleedka	H M H M	<i>When I will get your warmth,</i>
Hormuudka is miidhay milgaa hordhignaa?	H M M H	<i>Guidance of grace and pride?</i>
Malaha Hodaneey hadday mudantoo	M H H M	<i>Oh! Hodan, your delightful personality</i>
Quruxi hal mannaa hibiyo mulkitoo	H M H M	<i>And charming attractiveness (Queen of beauty)</i>
Halacsiga majeertay hammuun ku mishoo	H M H M	<i>I felt greedy when I look at you</i>
Haween midabkaaga masayr la hogtoo	H M M H	<i>You made other women jealous of your loveliness</i>
Hoggaanka majiirtay ninkaad hor martoo	H M H M	<i>Man with whom you unite will be a leader</i>
Hurdada muuqaagu Hoodooy mirayoo	H M H M	<i>And he will not be able to sleep, Hoodo!</i>
Habeen magaciiyo hiddaad maashoo	H M H M	<i>Grace is in your gene</i>
Hubqaadka martaada hannaan u mushaaxa	H M H M	<i>You walk with refinement and style</i>
Heego iyo marsooyin hillaac u marshaay	H M H M	<i>Brighter than the light of the rain</i>
Cirkoo mayay hooray hiraabta miraay	M H H M	<i>Beauty like clear sky</i>
Hareeriga maydhiyo midhii hohobtaay	H M M H	<i>Embellished like crops of the tree</i>
Milicsiga hoobaantoo mooddii hojisaay	M H M H	<i>Alluring like evergreen land</i>
Hibaaq midabkiisa madheedh huwadaay	H M M H	<i>Fascinating color, covered with Madheedh</i>
Hablaa mudankooda horyaal ka mudhaay	H M H M	<i>Dazzling like no other women</i>
Habiga iyo maanka hankayga mudaay	H M H M	<i>You own my heart</i>
Horraadka miskeedka markaaga hanoo	H M M H	<i>Try to win my heart as I am trying yours</i>
Haasaawe mullaax leh hir muuqdiyo guur	H M H M	<i>Eloquent talk with anticipation of marriage</i>
Hannaanka milgaa leh ka hoo midigtoo	H M H M	<i>Exquisiteness is all yours</i>
Hadmaan mudankaaga haldoor madaleedka	H M H M	<i>When I will get your warmth,</i>
Hormuudka is miidhay milgaa hor dhignaa?	H M M H	<i>Guidance of grace and pride?</i>

4.7. Lyricist: Yaxye Yeebaash

Poem: *Xaqlaha Wadnaha*. Alliteration on X + X. Net yet arranged a music for it. Translated by Nasra Dahir Mahamed and Jama Musse Jama [27].

Xajiin li' ruux wax xeersha,	X X	<i>Respectful to all</i>
Xog aasa faq ii xaseeya,	X X	<i>My secret guardian</i>
Xil qaada xasuuso dhawra,	X X	<i>that cherishes and shield our love memories</i>
Xaq sheega xifaaltan diida,	X X	<i>Tells the truth and rejects meaningless talks</i>
Xis deeqa dareenka xooja,	X X	<i>You complete me, protector of our love</i>
Xulbaad tahay nool xaggayga.	X X	<i>You are my one</i>
Xayndaab dhaqankii ma xooraa,	X X	<i>You mesmerize the culture</i>
Misana xor ahoo xubeera,	X X	<i>With strong personality</i>
Damiir xidha ruux xanbaara,	X X	<i>and boundaries</i>
Xamdiya Rabbigeed la xaala,	X X	<i>Thankful to her ALLAH</i>

Xumaan iyo godob xabaala,	X X	<i>You are pure from all the bad things</i>
Xan dhiidhiya xeer ma jiidha,	X X	<i>The one with rare shyness (shyness is your clothes)</i>
Xishood dhaba xag u hagoon,	X X	<i>You are the closest person I have honey!!</i>
Xigaal i xigaay xayaati,	X X	<i>And you deserve to be my partner</i>
Xilaad tahay xaas la yeesho.	X X	<i>You own my heart</i>
Xaqlaha wadnahaay xannaano,	X X	<i>You stimulate my affection</i>
Xalaan godlay xiisihiiye,	X X	<i>This is for you,</i>
Bal hoo dhan xabiibii xoorka.	X X	<i>And drink it like a fresh milk</i>
Qof xooliyo xaalad gaara,	X X	<i>Your happiness is not dependent on situations</i>
Ku xidhin inay xiiso qaaddo,	X X	<i>A civilized person with wisdom</i>
Xaddaariyad weedha xoogin,	X X	<i>And easy communication</i>
Xaajalay xubin doodda siisa,	X X	<i>Knows the value of time</i>
Xisaabtama aan xarraamin,	X X	<i>You are free from all bad talks</i>
Xodxodis iyo hadal xashiisha,	X X	<i>You do not waste your time senselessly</i>
Xumbiyo higil kuma xagaafa.	X X	
Kolkaan xummad iyo xanuusto,	X X	<i>You feel my pain when I am sick,</i>
Xarbiga ruux ila xumaada,	X X	<i>You are patient</i>
Qof ii xammil loo xuf boodin,	X X	<i>With pure heart</i>
Laab xuunshalay aan xanaaqin,	X X	<i>Tolerance with generosity</i>
Dulqaad xasladaay xaruuri,	X X	
Xigmaddan hoo igu xasuuso.	X X	<i>This poem is for you to remember me</i>
Xaqlaha wadnahaay xannaano,	X X	<i>You own my heart</i>
Xalaan godlay xiisihiiye,	X X	<i>You stimulate my affection</i>
Bal hoo dhan xabiibii xoorka.	X X	<i>And drink it like a fresh milk</i>
Gugoo xili omos ku xaytay,	X X	<i>Desert with no rain</i>
Kob siigo xidhoo xagaaya,	X X	<i>With dust in summertime</i>
Intuu waqal xooggan xooray,	X X	<i>then heavily clouds gather</i>
Cirkii ku xijaabay xeego,	X X	<i>And rain start raining</i>
Dhulkiina ka xaaqay xaabka,	X X	<i>And the land cleans from the dust</i>
Xareedda toggo xammaarta,	X X	<i>And natural rainwater starts flooding</i>
Dhirtoo midab xidhan xariira,	X X	<i>With the beauty of new leaves</i>
Xidhbaad tahay wada xayaaba.	X X	<i>You embody like this beauty</i>
Waxaas xidid dhiig xammaala,	X X	<i>All my blood vessels</i>
Laf iyo xangullaha xaraysan,	X X	<i>My bones and the spinal cord</i>
Cadkiyo xinjiraha xinnaysan,	X X	<i>My voice and all of me,</i>
Dareen xulay xaadda xaaqye,	X X	<i>is infected by your love</i>
Kal xaashiya oon u xadhay,	X X	<i>My heart is only for you</i>
Inaan ku xarriiqo xiiso,	X X	<i>I am here to give you happiness</i>
Ayaan xubbi kuu xalaaye,	X X	<i>Keep on your side</i>
Xannaano ku soor xidhiidhka.	X X	
Xaqlaha wadnahaay xannaano,	X X	<i>You own my heart</i>
Xalaan godlay xiisihiiye,	X X	<i>You stimulate my affection</i>
Bal hoo dhan xabiibii xoorka.	X X	<i>And drink it like a fresh milk</i>
Xarrago laafyaha xidhiidhsan,	X X	<i>Your style and independence of your walk</i>
Xaawalay qurux kala xarooda,	X X	<i>You took all the beauty</i>
Indhaha xirribaha ku xoodan,	X X	<i>Your gorgeous eyes</i>
Xagasha rabbi saaray xeesha,	X X	<i>And the magnetism of your hands</i>
Xadkii dhaban xaad ku yeeshay,	X X	<i>prettiness of your face</i>
Xakaar saxarkii xagtaayi,	X X	<i>Elevate my sentiment</i>
Xaasha'e sow ima xanuujjo!	X X	
Xurmaad tahay xuuralcayna,	X X	<i>You are the women from paradise</i>
Xilqaanka na xarun jacayla,	X X	<i>Center of love</i>
Xalwaadka na xabag barsheeda,	X X	<i>And unique person</i>
Xayo na xarafkii Islaama,	X X	<i>Shyness from the Islamic teaching</i>
Qof loo xusliyaad la xeertay,	X X	<i>You are the person who deserve to share live with</i>
La xaawilo waad la xaaltay,	X X	
Sidii xaramkii xaj baad tay,	X X	<i>You like the Hajj pilgrimage for me</i>

Haddaan xiiqoon xabeebtay,	X X
Xuskaaga haddaan xadreeyay,	X X
Xaqbaan xiddigeyey u yeeshay!	X X

*I have been waiting for you
And struggle to find you
and you earn it*

Hargeysa: Ponte Invisible.

5. Conclusion

Classical Somali poetry had mainly social themes pertinent to pastoral-nomadic life, including conflict, warfare, inter-clan politics, and later focused on anti-colonial patriotic sentiment and pan-Africanism in the late 1950ies. Labour songs, love metaphors, and lyrics on the beauty of nature were used as a political allegory against dictatorship and demand for social reform in 1970-80ies. See Woolner [28] for more information about Somali love songs and their engagement with social life. In Jama Musse [29] we discussed differences and similarities between the customs and habits of young and old generations poets, and between the genders, as well as tackling more philosophical themes such as the incessant migration from the East African countries to Europe and the US and the calamities met in the course of these often-reckless voyages. In this article, we consolidated the idea that urbanization and advancement of knowledge in science and philosophy are taking drastic changes to the place and social role of poetry in Somali society, and that new social themes are being dealt with orality. The use of poetry still maintains the fascinating role of medium of communication, but with the new generation of formally educated lyricists, the experimentation of new styles of poetry as well as new imaginative themes are becoming a new territory of art production. The Arabic influence of Somali poetry has been questioned by Andrzejewski in [30] and discussed by Morin in [32] but also recently by Orwin in [31]. In [31] in particular, the author shows how a specific Somali metrical pattern “can be seen as a Somalized analogue of the Arabic kāmīl metre in its majzū’ or dimetric form.” In this article, we instead showed how contemporary poets are using the rhymed style of Arabic poetry in Somali lyrics. We finally introduced with examples the concept of multiple alliterations in Somali poetry, as a new style of transforming literature, and observed how this is also making difference in the musical composition of the Somali song. The 21 lyrics selected from the Somali Corpus repository as examples constitute a good representative of this new experimentation with a new style of poetry by contemporary songwriters and indicate the need for further research on the impact this has on the musicality of poetry reading and on musical composition for Somali songs.

References

- [1] Andrzejewski, B. W. “The Introduction of a national orthography for Somali.” *African Language Studies*, XV, 1974, pp. 199-203.
- [2] [Jama Musse Jama] Jaamac Muuse Jaamac, “Gorfeyn Riwaayadeed: Aqoon iyo Afgarad waa murti ku habboon in maanta la isu sheego”, *Dhaxalreeb* 1-2015. Special issue.
- [3] Afrax, Maxamed Daahir, “Between continuity and innovation: transitional nature of post-independence Somali poetry and drama, 1960s – the present.” PhD Thesis. SOAS, University of London, 2013.
- [4] Gaarriye, Maxamed Xaashi Dhamac, “Toddobadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada”, *Xiddigta Oktoobar*, Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 17 January, 1976, 3.
- [5] Carraale, Cabdullaahi Diiriye Guuleed, “Hawraaray ninba si kuu qaaday,” *Xiddigta Oktoobar*, Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 10 January, 1978, 3.
- [6] Carraale, Cabdullaahi Diiriye Guuleed, “Miisaanka Maansada Soomaaliyeed”, Abokers Forlag, 2003.
- [7] Johnson, J. W., “Musico-metro-syllabic relationships in the scansion of Somali oral poetry”. In Hayward R. J. and Lewis I. M. (ed.): *Voice and power, the culture of language in North East Africa: Essays in honour of B. W. Andrzejewski*. (African Languages and Cultures Supplement, 3), 1996. London: School of Oriental and African Studies, 73-82.
- [8] Gamuute, Farah Ahmed Ali, “Coming of age: an introduction to Somali metrics”, 2018. Pisa: Ponte Invisible.
- [9] Orwin, M. “Crafting modern Somali poetry: Lyric features in ‘Fad Galbeed’ by Gaarriye and ‘Xabagbarsheed’ by Weedhsame”, *Journal of African Languages and Literature*, No. 1, 2020. Open access at <https://doi.org/10.6092/jalalit.v1i1.6737>.
- [10] Banti, G. and Giannattasio, F. “Music and meter in Somali poetry”. In Hayward R. J. and Lewis I. M. (ed.): *Voice and power, the culture of language in North East Africa: Essays in honour of B. W. Andrzejewski*. (African Languages and Cultures Supplement, 3), 1996. London: School of Oriental and African Studies, 83-127.
- [11] Kirk, J. W. C., “A grammar of the Somali language with examples in prose and verse and on account of the Yibir and Midgan dialects.”, 1905, Cambridge: Cambridge University Press.
- [12] Banti, G. “Oromo literature”. In Siegbert Uhlig - David Appleyard - Alessandro Bausi - Wolfgang Hahn - Steve Kaplan (eds.), *Ethiopia. History, Culture and Challenges* (Afrikanische Studien / African Studies, 58, Berlin - Münster - Wien - Zürich - London: LIT Verlag and Michigan State University Press, 2017).
- [13] Andrzejewski, B. W., Somali literature in B. W. Andrzejewski, S. Pilaszewicz and W. Tyloch (ed), *Literatures in African languages*, 1985, Cambridge University Press. Varsavia.
- [14] Jama Musse Jama, “A Syntactically Annotated Corpus Of Somali Literature”, unpublished PhD thesis, Oriental University of Naples, 2016.
- [15] Andrzejewski, B. W. “Reflections on the nature and social function of Somali proverbs.” *African Language Review*, 7, 1968, pp. 74-85.

- [16] Hadraawi, Mohamed Ibraahin Warsame, *Bulsho (Society)*, in Herbert, W. N.; Hussein, Said Jama, (eds.), *Bulshoy Ma Is Baran Lahayn: Ururin Maansooyin Soomaali Ah Oo Waayahan Tisqaaday*, Hargeysa, Pisa and London: Ponte Invisible, Kayd Somali Arts and The Poetry Translation Centre, 2018.
- [17] Orwin M., Alliteration in Somali Poetry. In: Roper J. (eds) *Alliteration in Culture*. Palgrave Macmillan, London. 2011. https://doi.org/10.1057/9780230305878_14.
- [18] Kapchits G., “Soomaali Been Ma Maahmaahdo / Somalis do not lie in proverbs”, 2012, Pisa: Ponte Invisible.
- [19] Cali Maxamed Yuusuf “Caligurey” (Ururintii), “Geeddigii Cabdiqays”, 2019, Hargeysa: Sagaljet.
- [20] Personal communication, Interview with Cabdiraxmaan Cismaan Xaaji, January, March and July 2019, Hargeysa.
- [21] Personal communication, Interview with Mawliid Aadan Qolqol, Phone Interviews, April-May, 2019, Hargeysa-London.
- [22] Personal communication, Interview with Cabdiraxmaan Xadanteeye, Phone Interviews, March, 2019, Hargeysa-London.
- [23] Personal communication, Interview with Sir Maxamuud Cumar Yare, Phone Interviews, March, 2019, Hargeysa-London.
- [24] Jama Musse Jama, “A syntactically annotated corpus of somali literature”, *Unpublished PhD doctoral thesis*, Oriental University of Naples, 2016, Naples, Italy.
- [25] Personal communication, conversation with Xasan Saleebaan Dhuxul “Laabsaalax”, August 2019, Hargeysa Cultural Centre, Hargeysa.
- [26] Personal communication, conversation Maxamed Aw Cali Cartan, December 2019, Hargeysa Cultural Centre, Hargeysa.
- [27] Personal communication, conversation Yaxye Yeebaash, December 2020, Hargeysa Cultural Centre, Hargeysa.
- [28] Woolner, C. J., *The Labour of Love Songs: Voicing Intimacy in Somaliland*, Unpublished PhD dissertation, King’s College, University of Cambridge, 2018.
- [29] Jama Musse Jama, “So At One With You: An Anthology of Modern Poetry in Somali.” *Eastern African Literary and Cultural Studies*, 5:2, 2019, pp. 147-150, DOI: 10.1080/23277408.2019.1595322.
- [30] Andrzejewski, B. W. “Is There Arabic Influence in Somali Poetry?” *Journal of African Cultural Studies*, vol. 23, no. 1, 2011, pp. 59–72 (reprinted unpublished Manuscripts dates June 1968).
- [31] Orwin, M. “Arabic influence on metre in Somali Sufi religious poetry”, *Brill’s Journal of Afroasiatic Languages and Linguistics*. 11, 2019, pp. 340–374.
- [32] Morin, D. “Le texte légitime: Pratiques littéraires orales traditionnelles en Afrique du nord-est.” *Langues et Cultures Africaines* 25. 1999. Paris: Peeters.